

# Imtixaanka wadista baabuurta. **Ku saabsan baabuurkaaga.**

Kahor inta aanu bilaabmin imtixaankaaga wadista baabuurka, waxaan u baahan doonaa inaan aragno cadeynta caymiska mas'uuliyadda hadda jira. Waanu hubin doonaa gaadhigaaga si aanu u hubino inuu si fiican u shaqaynayo. Wawa laga yaabaa in qaar ka mid ah goobaha lagu qaado imtixaanada wadista baabuurta ay haystaan baabuur loogu talagalay imtixaanka wadista baabuurta iyada lagaa qaadayo lacag dheeraad ah.

## Caddaynta caymiska mas'uuliyadda wakhtigan.

Caddeynta caymiska mas'uuliyadda wakhtigan waxay u baahan tahay inay tilmaanto:

- Qofka iska leh siyaasada caymiska.
- Faahfaahinta baabuurka.
- Wakhtiga ay bilaabmayso siyaasaddu iyo wakhtiga ay dhamaanayso.

Baadhaha fulinaya ama qaadaya imtixaankaaga kuma xaqijin karo caddaynta caymiska isaga oo taleefan adeegsanaya. Dib u dhac kasta oo ku yimaada bixinta caymiska mas'uuliyadda wakhtigan waxay keeni kartaa in dib loo dhigo ballantaada.

## Shuruudaha Baabuurka

Haddii aanu shaqaynayn mid kasta oo ka mid ah qqlabka baabuurku, imtixaan qaaduhu ma samayn doono tijaabada wadistaada. Imtixaan qaaduhu waxa uu hubin doonaa:

- Nalalka Biriiga (oo ay ku jiraan iftiinka dhexe).
- Calaamadaha leexinta.
- Suunka kursiga (waa in si fiican loo xidho oo loo furo).
- Taargada shatiga (waa in uu ansax yahay).
- Biriiga baarkinka.
- Muraayadaha dabaysha (oo laga hubiyay shay kasta ama dildilaaca wax u dhimaya aragga badbaadada leh).
- Albaabka rakaabka (waa in laga furo oo laga xidhaa gudaha iyo dibaddaba).
- Daaqadda albaabka darawalka (waa in ay hoos noqon kartaa ilaa meel fog si ay kuugu ogolaato isticmaalka calaamadaha gacanta).
- Muraayadaha (sharcigu wuxuu u baahan yahay muraayada bannaanka ee bidix iyo muraayada gudaha ee dib-u-eegista ama muraayada bannaanka ee bidix iyo tan bannaanka ee midig).
- Masaxadaha muraayadaha hore, nalalka hore, iyo qaboojiyayaasha (haddii cimiladu u baahan tahay in la isticmaalo).



# Imtixaanka wadista baabuurta.

## Ku saabsan baabuurkaaga.

### Baaburta la kiraysto

Darawalada shatiga haysta oo kaliya ayaa isticmaali kara baabuurta kirada ah.

**Adiga, imtixaan qaadaha, xayawaan adeege ah, iyo turjubaanka dhagoolaha ee loogu talagalay dadka maqalka adag** ayaa lagu ogolyahay gaariga inta lagu jiro imtixaanka. Mararka qaarkood mid ka mid ah kormeerayaashayada ama shaqaalaha tababarka ayaa laga yaabaa inay u raacaan kormeere ahaan. Haddii aad diidantahay, fadlan noo sheeg xiliga bilowga imtixaanka.

Wax hub ah looma ogola gaardhiga gudhiisa.

